

Xeer Wasaaradda K. iyo Gaadiidka Badda, L. 14 ee 2 Maar-
so 1986, Maraakiibta Kalluumeysiga.

WASIIRKA K.&G.B.

Markuu Arkay: Dastuurka JDS;

Markuu Arkay: Sharciga Lr. 17 ee soo baxay 3 Feb. 1977
oo lagu dhisay Wasaaradda Kalluumeysiga;

Markuu Arkay: Sharcij Lr. 23 ee 3 Nofembar 1985 ee ah
Sharciga Kalluumeysiga Soomaaliyeed;

Markuu Arkay Sharciga maaigelinta shisheeyaha;

Markuu Arkay: Nidaamka Royalaatiga maraakiibta shi-
sheeyaha laga qaado;

Markuu Tixgeliyey: Talo soo jeedinta mas'uuliyiinta
sare ee Wasaaradda.

WUXUU SOO SAARAY XEERKAN SOO SOCDA:-

Qod. 1aad

Maraakiibta Kalluumeysiga ee ajnabiga ah waxaa ruq-
sad kalluumaysi siin kara Wasiirka Wasaaradda Kalluumey-
siga iyo Khayraadka Badda.

Qod. 2aad

Maraakiibta kalluumaysiga ee Ajnabiga ah, waxaa laga
qaadayaa Royalaatiga hababka hoos ku xusan:

- B) Boqolkiiba labaatán 20% wax soo saarkooda, ha ahaa-
do cayn ama qiimo ahaan (kind or in cash).
- T) Quwad faraseedka markabka.H.P. oo midkiiba laga
qaado 80 dolars sannadkiiba iyo boqolkiiba todoba 7%
wax soo saarkiisa ha ahaado cayntiisa ama qiimahiisa.
kind or in Cash.
- J) Maraakiibta kalluumaysiga ee ajnabiga ah ee loo xiisaa-
ray cilmj-baarista ama sahan waxaa awood u leh xa-
dideedka royalaatigooda Wasiirka Wasaaradda Kalluu-
maysiga.

X) Hav'adaha iyo Shirkadaha Ainabiga ah ee Kalluumay-

ta kaluumaysiga, waxaa lagu dhaqayaa maraakiibtooda kalluumaysiga heshiisyo gaar ah.

Qod. 3aad

Maraakiibta kaluumaysiga oo Ajnabiga ah ee heshiisleyda ah Joint Venture oo ay si wadajir ah u wada maamulaan ama u wada leeyihiin Soomaaji iyo Shirkado Ajnabi ah, waxaa laga qaadayaa Royaalaatiga sidaatan ah:

B) Culuska Quwad Faraseedka HP oo midkiiba lagu dhifto US\$. 50 sannadkiiba iyo boqolkiiba 5% wax soo saarkiisa ha ahaado cayntiisa ama qiimahiisa. In kind or in Cash.

Qod. 4aad

Xeerkan wuxuu dhaqan gejayaa taariikhda la saxiixo, waxaana lagu soo saari doonaa Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda.

Muqdisho, 12ka Maarso 1986

W A S I I R K A

(Aadan Maxamed Cali)